



A Parent Resource

Youth Understanding and Gangs

Fahamka

Dhallinyarada

Iyo

Gaangiska



Macluumaadka Waalidka



2





Funded by the Social Sciences and Humanities Research Council of Canada

Acting Together: Community University Research Alliance

A message from Dr. Gira Bhatt and Dr. Roger Tweed

Let us hope for a bright and safe future for all our youth.

protected from the influences of criminal gangs.

It is critical for the community to act together to keep our youth safe and

involvement, so they can help their kids get back on a positive path.

All parents can benefit from learning to recognize the signs of gang-

hood to prevent them from wandering down it.

Parents also involve guiding children to avoid temptations that might

take them down a negative path. It is important to recognize a negative path, and

possible stage when our children might be exploring a negative path, and

parents can benefit learning to exhibit these qualities in turn.

You do all that you can to get them there. You care for them. You show them

them: A bright future filled with love, health, and opportunity. Like any parent,

your children mean the world to you. As parents you want only the best for

Our Future, Our Youth,

Dhallinyaradeena, Mustaqbalkeena

Carruurtiinu waxay iduin la mid yihii adduunka. Waalidahaan waxaad la rabtaan nolosha ugu fiican oo kaliya: Mustaqbal wanaagsan oo leh jacayl, caafimaad, and fursad. Sida waalid kasta, waxaad samaysaa wax kasta oo ad awoodid si ad mustaqbalkaa u gaarsiisid. Waad daryeeshaa, jacayl baad tustaa, waxaadna ku dhiirigalisaa inay ayaguna yeeshaan dhaqamadaas wanaagsan.

Waalidnimada waxaa kaloo ka mid ah in carruurta lagu hago siday uga badbaadi lahaayeen damacyada xun xun oo ku ridi kara wadda xun. Waxaa muhiim ah in sida ugu dhakhsa badan loo garto marka carruurteena ay dhici karto in ay ku socdaan dariiq xun, iyo sidi looga badbaadin lahaa inay waddadaa ku sii lumaan.

Waaliddiinta oo dhami waxay ka faa'iidaysan karaan inay bartaan sida loo garto calaamadaha carruurta gaangiska ku lug leh, si ay carruurtooda uga caawiyaan inay ku soo laabtaan dariqa saxdaa.

Waxaa muhiimad gaara leh in bulshadu isla shaqayso si carruurteenu u nabadgasho, loogana badbaadiyo duufsashada gaangiska dambiliyaaashaa.

An u wada rajeyno mustaqbal wanaagsan oo nabada dhallinyaradeena oo dhan.

Fariin ka timid Dr. Gira Bhatt iyo Dr. Roger Tweed

Wada Shaqayn: Isbahaysiga Cilmibaarista Jaamacadda Bulshada

Waxaa maalgaliyey Golaha Cilmibaarista Culuumta Bulshada iyo Aadanaha ee Kanada



Farriin ka timid Balwant Sanghera



Guddoomiyaha, Isbahaysiga Beesha
Koofur Aasiya ee La Dagaalanka
Gacan Ka Hadalka Dhalinyarada

Isbahaysiga Beesha Koofur Aasiya ee La Dagaalanka Gacan Ka Hadalka Dhalinyaradu waxay si joogtaa aad uga shaqaysaa sidii ay carruurteena ugu toosin lahayd dariqa wanaagsan. Si arintaa wax looga qabtana waxaan ku dhaqaanqay dhawr arrimood oo kala duwan, waxaan aad ugu faraxsanahay inaan idii soo bandhigo buugyarahaan ay iska kaashadeen jaalleyaashay, Laanta Ciidamada Wadajirka La Dagaalanka Gaangiska iyo Mukhaadaraadka Biritish Kolombiya iyo Wada Shaqynta Mashruuca Isbahaysiga Cilmibaarista Jaamacadda Bulshada, jaamacadda Kwantlen Polytechnic.

Muddadii an ku shaqaynayey Khabirka Cilmi-Nafsiya iskoolka, waxaan fursad u helay inaan si dhow ula shaqeyeo dhallinyarada, waaliddiinta, iyo macalimiinta. Halka arrin ee walwalka ugu badan igu abuuray waalid ahaan iyo haddoo an ahay awoowe waxaa weeye dhimashada murugada leh ee dhallinyaradeenu ku dhammaanayso halista khatarta ganacsiga

daroogada iyo gacan ka hadalka gaangiska macna darradaa.

Dhallinyarada in laga badbaadiyo inay ku dhacaan waddada gacan ka hadalka iyo ku biiridda gaangisku waxay u baahan tahay inaan waaliddiin, macalimiin, iyo xubnaha beeshuba mar walba la socono una diyaargarowno si an uga badbaadino dhallinyaradeena duufsashada gaangiska.

Boogyarahaan waxaa loo sameeyey in laga helo maclumaad iyo xogo wax ku ool ah oo ku saabsan sida ay gaangiska dambilayaasha ahi u shaqeyaan una qortaan dhallinyarada gobolkeena. Waxaana ugu sii muhiimsan in laga helo talooyin ku saabsan siyaabaha loo garto calaamadaha ugu horreya ee falaka gaangiska.

Waxaan ku rajo weynahay in dadaalkeena oo wadajira iyo isdhaafsiga maclumaadka iyo xogta sida buugyarahaan ay wax naga tarayaan sidii an ugu abuuri lahayn bulsho nabad qabta cid walba.

During my active career as a school psychologist, I had the opportunity to work closely with youth, parents, and teachers. One now as a grandfather is the tragic loss of our youth to the menace of the dangerous drugs trade and senseless gang violence. I remain optimistic that our collaborative efforts and shared resources such as this booklet will help us create a safe community for all. In addition to work closely with our province, I'm grateful it provides our youth in gang communities throughout the province about how criminal information about our youth from gangs influences. This booklet has been created to provide useful information to protect our youth from gang members remain informed and to present this booklet which is a collaboration between our partners, the Combined Forces Special Enforcement Unit-BC and the University Research Alliance Project, Acting Together Community Engagement Unit-BC and the Kwantlen Polytechnic University.

Message from Balwant Sanghera

The South Asian Community Coalition Against Youth Violence is hard in keeping countines to work hard in keeping our youth on the right track. In this regard we have undertaken several initiatives, and I am very pleased to present this booklet which is a collaboration between our partners, the Combined Forces Special Enforcement Unit-BC and the University Research Alliance Project, Acting Together Community Engagement Unit-BC and the Kwantlen Polytechnic University.



Message from Kevin Hackett

Chief Officer, Combined Forces Special Enforcement Unit – BC

I hope this booklet gives you a better understanding of how you can join us to fight the lure of gangs and gang violence in our communities. The police cannot fight gangs and organized crime alone, and there is a role for everyone to play in our collective fight against gangs, especially when it comes to intervention and prevention.

In reading this booklet you have taken an important first step to playing a significant part in understanding the issue of gangs and recognizing the warning signs. I encourage you to share this booklet and the information contained in it with your family and friends.

As the Chief Officer of the Combined Forces Special Enforcement Unit I am privileged to lead a team of 400 officers and civilians who are committed to the suppression of organized crime and gang violence throughout our province. As we have seen too often, those involved in gangs and organized crime have a callous disregard for the safety of others and it puts us all at risk.

Gangs and gang violence with the ethnicity, socio-economic status, and geography. We have seen places across B.C. and no city is immune to the effects of gangs. This is unacceptable to me, the police community, and I am sure, to you as well.

Gangs and gang violence transcede



gangs underpinned by fear, greed, and power. They prey on the most vulnerable members of our society, threatening the safety of our families and communities. They are responsible for countless acts of violence, including谋杀, kidnapping, and robbery. They also contribute to the decline of our neighborhoods through drug trafficking, prostitution, and other illegal activities.

It is clear that we must work together to address this problem. The police, government, and community must work together to develop effective strategies to combat gang violence. This booklet provides some basic information on how to identify and report gang activity. It also provides some tips on how to stay safe if you are targeted by a gang. I hope you find it useful.

Farriin ka timid Kevin Hackett

Sarkaalka Guud, Laanta Ciidamada Wadajirka La Dagaalanka Gaangiska iyo Mukhaadaraadka Biritish Kolombiya



Anigoo ah Sarkaalka Guud ee Laanta Ciidamada Wadajirka La Dagaalanka Gaangiska iyo Mukhaadaraadka Biritish Kolombiya, waxaan fursad u helay in an hoggaamiyo koox 400 oo saraakiil iyo dharcad isugu jira una xil saran ka hortagga dambilayaasha abaabulan iyo gacan ka hadalka gaangiska gobolkeena oo dhan. Sidii an aragnay in badan, dadkaan ku jira gaangiska iyo dambilayaasha abaabulan si arxan darraa ayeysan u tiixgalin nabadgeyada dadka kale, markii muran dheddooda ka dhashana anagoo dhan bay khatar na galisaa.

Gaangiska iyo gacan ka hadalka gaangisku waa dhaafsiisan yahay qolo, heerka dhaqan dhaqaale iyo xudduudda qolo gooni ah. Waxaan aragnay dilalka gaangiska oo ka dhaca goobaha bulshadu iskugu timaaddo gobolka Biritish Kolombiya oo dhan, mana jirto magaalo ka badbaadda waxyeelooyinka gaangiska. Arrintaasu waa wax an la aqbalii karin sida ay ila tahay, ciidamada booliiska la tahay, an hubana ay adigana kula tahay.

Waxaan rajeynaya in ad buugyaraahaan ka heshid faham wanaagsan oo ku saabsan sidii ad noogala shaqayn kari lahayd in la dagaallano dabinka gaangiska iyo gacan ka hadalka gaangiska beelaheena dheddooda. Booliisku kaligood lama dagaallami karaan gaangiska iyo dambilayaasha abaabulan, qof walbana kaalintii ay ka qaadan lahayd baa uga bannaan dagaalkeena midaysan ee an kula jirno gaangiska, gaar ahaan marka ay noqoto in laga hortago ama la soo dhengalo. Beelaha oo la shaqeeya booliiska iyo booliiska oo la shaqeeya beelaha ayaa ah sida an saamaynta ugu weyn ugu yeelan karno nolosha dhallinyaradeena.

Marka ad akhridid buugyaraahaan waxaad qaadday tallaabadii ugu horreysay ee muhiima oo ad qayb muuqata uga qaadan lahayd fahamka dhibaataada gaangiska iyo garashada calaamadaha lagu garto. Waxaan idinku dhiirrigalinaya in ad buugyaraahaan iyo macluumaadka ku jira la wadaagtaan qoyskiina iyo asaxaabtiina.



Why do criminal gangs target young teenagers to participate in their gang activities?

Persecuting a youth to take
the first step of accepting and
delivering a drug package is the
beginning of a dangerous path
that leads to gang involvement.

In B.C., criminal gangs are known to recruit young men around the age of 16 who have their drivers' license. Like typical teenagers, the youth are open to adventure and are willing to try out new and dangerous ways of living. The lure of making quick money on the side can be very tempting for this age group. Also, gambling for this age group is also a small package and deliver it to a desigualated location.

therefore any criminal conviction may result in a more lenient sentence and possibly no jail time.

Once a cargo of drugs arrives, the gangsters need sales agents—those who will pick up small packages from the middlemen and deliver them to drug consumers. Since the older gangsters do not want to be caught by police while delivering drugs, they target teenagers with any history of criminal involvement. If caught by the police, the amount of drugs in their possession is generally minimal and

remain in demand and are available to those who want to use them. To keep their trade flourishing they need to make sure that these drugs cocaine, ecstasy, and marijuana. The sale of illegal drugs such as

Criminal gangs make money from the sale of illegal drugs such as cocaine, ecstasy, and marijuana.

Maxay gaangiska dambilayaasha ahi u bartilmaameedsadaan dhallinyarada dhawr iyo tobantirkaa in ay ka qayb qaataan falalkooda gaangistarnimo?

Gaangiska dambilayaasha ahi waxay lacag ka sameyaan iibinta doroogooyinka sharci darradaa sida cocaine, ecstasy, iyo marijuana. Si ay mar walba ganacsigooda u horumariyaan waxay u baahan yihiin in ay xaqiijiyaa in doroogooyinkaas mar walba baahi loo qabo, ayna heli karaan ciddii u baahata in ay isticmaasho.

Marka ay shixnad dorooga ahi u timaaddo, gaangistaradu waxay u baahan yihiin 'wakiillo iib' – kuwaasoo ka qaadi doona xirmooyin yar yar nullaalka dhexe una geeya dadka doroogada isticmaala.

Maadaama gaangistarada waaweyni aysan doonayn in booliisku qabto marka ay doroogada geynayaan, waxay bartilmaameedsadaan dhallinyarada dhawr iyo tobantirkaa, oo badankoodu aysan lahayn wax horoo falal dambiyeed ah. Haddii booliisku qabtana, doroogada gacantooda ku jirtaa badanaaba waa wax yar, sidaa darteedha wixii dambiyoo lagu xukumaa wuxuu noqonayaa wax aad u sahlan oo ay dhici karto in aysan xabsi galin.

Gobolkaan Biritish Kolombiya, gaangiska dambilayaasha ah waxaa lagu yaqaan in ay qortaan rag dhallinyaraa oo da'doodu u dhow dahay 16 sano lehna laysinka wadidda baabuurtta. Sida dhawr iyo tobantirkaa lagu yaqaan, dhallinyarada khatartu waxba lama ahan waana rabaan in ay isku dayaan habab nololeed cusub oo khatar ah. Dabinka lacag ay deg deg ugu samaynayaan ayaa aad u hunguri galin kara kooxda da'daasa. Sidaas oo kale, khatartuna waxaa dhici karta in aysan saa ula sii weynen maadaama waxa ay samaynayaan oo dhami ay tahay in ay qaadaan xirma yaroo doroogaa geeyaanna meal la isla og yahay.

Dhallinyarada oo laga dhaadhiciyo (shukaamiyo, qalqaaliyo) in ay qaadaan tallaabadaa ugu horraysa oo ah in ay qaadaan geeyaanna xirma doroogaa ayaa ah bilowga dariiqo khatar oo ku hoggaaminaysa in ay ku biiraan gaangiska.

Tallaabada Ugu Horraysa Ee Looga Mid Noqdo Gaangiska Dambilayaashaa:

Waxay ka bilaabataa heerka Darooga libiye.

- » Darooga libiye waa qofka geeya doroogooyinka bara cayiman maalintii ama habeenkii.
- » Darooga libiye badanaaba waa dhawr iyo toban jir ama qof dhallinyaraa oo haysta ama heli kara baabuur (gaari).
- » Waxay u shaqaysaa sida adeegga biitsa gayntaa oo kale. Qofka dhallinyarada ahi wuxuu kooxda gaangiistaradaa ka qaataa ugu yaraan hal telefoon oo kan gacantaa (cell phone). Macaamiishuna – kuwii daroogo u baahan – waxay kaliyoo

wacaan nambar telefoon. Qofka dhallinyaradaa baa telefoonkaa ka jawaaba, ka bacdina baabuurkiisa ama baabuurkeeda kula carara deroogada oo geeya barta ama cinwaanka la siiyey.

» Badanaaba marka la soo waco Darooga libiyaha, deroogada waxaa lagu geeyaa nus saac ilaa hal saac. Macaamiisha / dadka deroogada isticmaala waxaa li siyyaa nambar telefoon oo ay wacaan si ay u dalbadaan deroogada.

Dallaalada Dhexe waa kuwa deroogada u qaybiya Darooga libiyayaasha. Ayadoo ku xiran hadba sida wax looga gato Darooga libiyaha, Dallaalka Dhexe wuxuu halkii Darooga libiyaba ka soo xarayn karaa ilaa iyo \$1500 doolar maalintii. Dallaalada Dhexe waxay badanaaba deroogada ka qaybiyaan guri ammaana.



Guryaha ammaankaa waxaa badanaaba magacooda ku kireeya ama xataa magaca xubno qoyskoodaa oo ay suurtowdo in aysan ka warqabin waxa guriga ka dhacaya, dad la siyo xoogaa uuuraa. Guryahaasu badanaaba waa maran yihii, mana jiraan wax halkaa yaalla oo ku lug leh qof gaangiska ku jira.

Safe houses are typically rented by individuals who are paid a nominal fee to do so in their own names or even family members who are likely unaware of what is happening in the house. The premises are usually run by a reloader can bring in drugs of activity in Dial-a-Doping, a drug dealer. Depending on the amount supplied the drugs to the Dial-a-house number. The youth answers who need drugs—simply dial a gangster group. The customers—at least one cell phone from the delivery service. The youth gets it works very much like a pizza phone number. The youth answers who need drugs—simply dial a gangster group. The customers—at least one cell phone from the delivery service. The youth gets a teenager or young adult who has access to a vehicle.

» A Dial-a-Dopser is typically a Dial-a-Dopser is an individual who delivers drugs to specific locations day or night.

» It begins with the **Dial-a-Dope** stage.

The First Step into Criminal Gangs:





Below are facts based on extensive evidence compiled by police evidences on their interactions with street level Dial-a-Dope-involved youth. departments on their interactions with

- » Dial-a-Dopers are **not** well protected by the gang leaders.
- » Given the secrecy of gang life, **the families** of Dial-a-Dopers are **not** well-protected from any direct involvement in the transactions.
- » Dial-a-Dopers almost always have a valid driver's license.
- » Most gangs do **not** give the Dial-a-Dopers access to stolen vehicles for transporting drugs.
- » Before being hired by a gang, Dial-a-Dopers do **not** need to show loyalty by stealing from a rival gang.
- » Despite their low level in the gang hierarchy, it is **not** easy for Dial-a-Dopers to leave the gang at any time.
- » Dial-a-Dopers are drawn to gang life by the prospect of making a great deal of money.
- » Dial-a-Dopers make very little money.
- » Dial-a-Dopers will front (provide without payment) drugs to their trusted customers.
- » Dial-a-Dopers are at risk of being "ripped off" of their drugs.
- » Dial-a-Dopers are almost always held responsible for any losses.
- » Despite the strict control of the gang leader, it is common for Dial-a-Dopers to **accumulate debts**.
- » The gang leader will **not** always know who his Dial-a-Dopers are and the Dial-a-Dopers **not** always know whom they are working for.

Kuwan hoose waa xaqiyooyin ku salaysan caddaymo fara badan oo ay qaybaa booliisku ka aruuriyeen intii ay ku hawllanaayeen dhallinyarada dariqa daroogada ku gadda.

- » Darooga Gadayaasha waxaa nolosha gaangiska galiiyaa waa rajada ay ka qabaan in ay lacag fara bada sameeyaan.
- » Darooga Gadayaasha waxay sameeyaan lacag aad u yar.
- » Darooga Gadayaashu waxay daroogada **u horumariyaan(siiyaan ayadoo aysan lacag bixin)** macaamiishooda ay ku kalsoon yihiiin.
- » Darooga Gadayaashu waxay khatar ugu jiraan in deroogadooda laga dhaco ama khayaamo.
- » Darooga Gadayaasha ayaa mar walba dusha loo saaraa wixii khasaaraa.
- » Marka laga tago xisaabtanka adag ee hoggaamiyaha gaangiska, waxaa caada u ah in Darooga Gadayaasha **dayn badani ku ururto**.
- » Hoggaamiyaha gaangiska **mar walba ma** yaqaano Darooga Gadayaashiisa, Darooga Gadayaashuna iyaguna **mar walba ma** yaqaanaan cidda ay u shaqaynayaan.
- » Maadaama ay nolosha gaangisku sir tahay, **qoysaska** Darooga Gadayaashu **kama** gaashaana khataraha uga imaan kara ka ganacsiga deroogada.
- » Darooga Gadayaashu badanaaba waxay haystaan laysinka baabuurtu lagu wado oo shaqaynaya.
- » Gaangiska badankoodu **ma siiyaan** Darooga Gadayaasha baabuurt la soo xaday in deroogada lagu qaado.
- » Ka hor inta aysan shaqaalaysiin gaangis, Darooga Gadayaashu **uma baahna in ay** muujiyaan daacadnimo ayagoo wax ka khayaamaya gaangis ka soo horjeeda.
- » Inkastoo ay kala sarraynta gaangiska heer hoose ka joogaan, Darooga Gadayaasha **uma** fududa inay ka baxaan gaangiska marka ay rabaan.

Runta kharaar ee ku biiridda gaangiska

- » Dhallinyarada gaangiska ku cusub (badankooduna joogaan heerka Darooga Gadaha) waxaa badanaaba laga dhaadhiciyaa in ay lacag fara badan samaynayaan – waana sheegasho 99% been ah.
- » Kuwa badani waxay ku dambeeyaan faqri / saboolnimo ka sii xun markii ay bilaabeen oo ay ugu wacan tahay deyn ay ka qabaan gaangiskooda (deyn ay la daaheen, doroogo laga khayaamay, doroogo ay deyn ku bixiyeen).
- » Gaangiska badankoodu waa xubno hoose oo haddii ay ka shaqeeyaan makhaayadaha cuntada deg deggaan samayn kara lacag ka badan. Qaarkood waxaa dhacda in ay ku faanaan markay lacag haystaan, haseyeeshe sida ay u badan tahay wax lacag ah ma haystaan ama deyn baa lagu leeyahay.
- » Kuwa badani waxay ku dambeeyaan in ay lacag amaaħdaan ama lacag ka xadaan qoyskooda ama alaabtooda gadaan si ay deynta isaga bixiyaan oo badanaaba dabooli weyda deynta ay qabaan, taasoo ku dambeysa in xubnaha gaangisku yimaadaan guriga

qoyska si ay reerka u dhacaan ama u dhaartaan waalidka ama walaalaha.

» Badanaaba waa la afduubaan, garaacaa, ama jir dilaa si ay farriin ugu diraan xubnaha kalee gaangiska.

» Macaamiisha ayaa dhacda oo garaacda

» Booliiska ayaa bartilmaameedsada waxaynaa u badan tahay in la xiro, hantidooda lagala wareego haddii ay isticmaalayeen markii ay dambiga galayeen, **dambiga diiwaanka u galayaana wuxuu ka hor istaagayaan waxyaaba ay qabsan lahaayeen sida waddanka kanada in ay bannaankiisa u dhoofaan.**

» Sababaha ugu badan ee ay gaangiska uga baxaan mid ka midihi waa ayagoo khaati ka istaaga sidii hadba loo garaacayey.

» Xubnaha dhallinyarada gaangiska badankoodu aakhirkaa waa isaga baxaan gaangiskooda, haseyeeshee marba markay ka sii badan tahay intay ku jireen ayey ka sii adag tahay in ay isaga baxaan.

- » Many end up having to borrow or steal money from their family or sell their possessions just to pay off debts and that is often not enough, which results in gang members coming to the family's home to extort or threaten parents or siblings.
- » Most youth gang members eventually quit their gang, but harder it is to quit.
- » One of the most common reasons to quit is being tired of getting beat up.
- » Most gang members are low-level members who could earn more money by working at a fast food restaurant. Some may show off whenever they have money, but more often than not they are broke or in debt.
- » When they started because they owe money to their gang (late payments, drug rips, fronting drugs).
- » They are targeted by the police and are likely to be arrested, used during the commission of a criminal offence, and **a criminal record will prevent them from doing things like traveling outside Canada.**
- » They get robbed and beaten by customers.
- » They will make a lot of money—a claim that is 99% false.
- » The newcomers to a gang (most of them at the Dial-a-Doper level) are almost always led to believe they will messages from one gang member to another.
- » They are often kidnapped, beaten, and tortured as a way of sending a message to another.
- » Many end up poorer than when they started because they owe money to their gang members who could earn more money by working at a fast food restaurant. Some may show off whenever they have money, but more often than not they are broke or in debt.
- » Most gang members are low-level members who could earn more money by working at a fast food restaurant. Some may show off whenever they have money, but more often than not they are broke or in debt.
- » Many end up having to borrow or steal money from their family or sell their possessions just to pay off debts and that is often not enough, which results in gang members coming to the family's home to extort or threaten parents or siblings.

Bitter truth about joining gangs

Recognizing the signs of a Dial-a-Doper Youth

die before age 30.
members are likely to
Research shows many

- » Typically, Dial-a-Dopers do keep the drugs they are selling at home.
- » Dial-a-Dopers will have a number of different cellphones.
- » The process of selling drugs via Dial-a-Doping takes the youth out of the house for short durations and often at all hours of the day and night.
- » Dial-a-Dopers tend to keep their room locked or demand privacy and will often become upset or mad if parents or siblings want to know what is in their rooms or why they want privacy.
- » Dial-a-Dopers are under great pressure and will often display signs of stress or moodiness.
- » Dial-a-Dopers often carry a lot of cash even though they live in debt and fear.
- » Dial-a-Dopers often possess business cards.
- » Dial-a-Dopers often possess financial records.

Garashada calaamadaha Dhallinyarada Darooga Gadaha ah

- » Darooga Gadayaashu waxay haystaan dhawr telefoonada gacanta oo kala duwan
- » Habka Darooga Gaduhu deroogada u iibiyaa waxay qofka dhallinyaradaa u keenaysaa in u guriga hadba ka baxo waqtiyo gaagaaban, oo badanaaba ah saacad kasta oo maalintii iyo habeenkii.
- » Darooga Gadayaashu badanaaba waxay leeyihii kaararka ganacsiga (business cards).
- » Darooga Gadayaashu badanaaba waxay jeebka ku sitaan lacag fara badan, inkastoo ay ku noolyihii deyn iyo cabsi
- » Darooga Gadayaashu badanaaba waxay diiwaan galuyaan xisaabaadka lacagaha soo gala ama ka baxa.
- » Caada ahaan, Darooga Gadayaashu waxay dhigtaan deroogada ay gadayaan guriga.
- » Darooga Gadayaashu badanaaba qolkooda way xirtaan ama waxay yiraahdaan yaan la ii soo galin, waana ka xumaadaan ama caroodaan haddii waalidka ama walaaluhu damcaan in ay ogaadaan waxa qolkooda ku jira ama sababta ay u rabaan in an loo soo galin qolkooda.
- » Darooga Gadayaashu waxay ku jiraan cadaadis fara badan waxaana badanaaba ka muuqda calaamado walwal ama dabeecado kala duwan.

Cilmibaaris baa waxay muujinaysaa in xubnaha gaangisku badanaaba
**ku dhintaan inta aysan
gaarin 30 sano.**

Ka hortagga Gaangiska

Maxay Waaliddiintu samayn karaan?

- » Mar walba ogsoonow halka ilmahaagu joogo, wixa ay samaynayaan, iyo cidda ay la joogaan. U macnee in su'aalaha ad weydiinaysid ee ku saabsan wixa ay samaynayaan iyo meesha ay jiraan ay kuugu wacan tahay in ad ayaga danaynaysid, ad jeceshahay, ayna kugu weyn yihiin.
- » Carruurtaada ka caawi in ay doortaan saaxiibo an ku lug lahayn wax falal ah oo dambi ah ama bulshada ka soo horjeeda.
- » Dhis isku xirnaan qoys oo adag, adoo xafladaha qoyska ka dhigaya kuwo maaweelo leh sida qadooyinka qoyska oo joogtaa, bannaanadoo ad u baxdaan, filimaanta oo ad daawataan iyo geymamka oo ad wada dheeshaan.
- » Carruurtaada u raac waxyaabha ay samaynayaan iskoolka ka bacdi sida cayaarahaa isboortiga, lana joog inta ay cayaarayaan oo dhan intii ad awoodid.
- » Ka qaybgal kulamada waalidka iyo macalimiinta iyo xafladaha iskoolka carruurtaada.
- » Xil iska saar shaqada guriga carruurtaada, hubina in ay dhammaystiraan.
- » Carruurtaada ku dhiirigali in ay ka qaybqaataan xarakaadka iskoolka iyo in ay iskaa wax u qabso uga shaqeeyaan beesha. Adiguna sidoo kale samee.
- » Xaqiji in ay ku faanaan dhaqankooda / qoomiyadooda / diintooda / afkooda dhaxalkaa ayagoo si buuxda uga qaybqaadanaya nolosha caadigaa ee bulshadeena.
- » Carruurtaada la yeelo wadahadal furan si ay ugu fududaato in ay kula wadaagaan waxyaabaha ay ka walaacsan yihiin ama walwalsan yihiin. Uga mahadceli kana abaalmari xogaha ay kula qaybsadaan, xataa marka ay xogtu noqon karto mid dhibi ka imaan karto.

- » Foster thankfulness in your kids by modeling thankfulness yourself for your own life situations and people in your life.
- » Rememember that kids learn a lot from observation. So modeling good behavior yourself, such as leading a life that is free of crimes, leading a life that is free of violence, and violence is very often as possible.
- » Rememember that kids learn a lot from observation. So modeling good behavior yourself, such as leading a life that is free of crimes, leading a life that is free of violence, and violence is very often as possible.
- » Encourage your kids to participate in school activities such as sports, school activities such as sports, and stay for the whole duration as often as possible.
- » Accompany your kids to after-school activities fun such as regular family dinners, outings, watching movies and playing games with them.
- » Build strong family ties by making anti-social activity.
- » Help your kids choose friends who are not involved in any criminal or antisocial activity.
- » Ensure that they take pride in their culture/ethnic/religious/linguistic heritages while fully participating in the mainstream life of our society.
- » Have open communication with your kids so they feel comfortable to share with you their concerns and worries. Thank them for sharing information, even when the information might be potentially worrisome.
- » Foster thankfulness in your kids by modeling thankfulness yourself for their comfortability to share with you their concerns and worries. Thank them for sharing information, even when the information might be potentially worrisome.
- » Encourage your kids to participate in school activities and do volunteer work in the community. Do the same yourself.
- » Always know where your kids are, what they are doing, and who they are with. Explain to them that you are asking questions about their activities and whereabouts because you are interested, and you care about them.
- » Encourage your kids to participate in school activities and do volunteer work in the community. Do the same yourself.
- » Participate in parent-teacher meetings and events at your kids' schools.
- » Take interest in your kids' homework and make sure they complete it.

Gang Prevention What can Parents do?

- » If you are worried that your kids may be involved in antisocial behavior, remember that it can be changed.
- » Avoid, tough love, such as cutting them off or forbidding them from going out. Instead, stay involved and let your kids understand that making mistakes and wrong choices are part of learning and that you will always help them correct their mistakes.
- » When you are worried about your kids' well-being and need some help, talk to their school teacher, counselor, or even a police officer. An earlier check and prevention will help your kids stay and gangs.
- » Make your kids understand that neighbours, and the community, come from having good trusting relationships with family, friends, long lasting happiness in life although money is important, choices.

- » Xusuusnow in carruurtu aad wax uga barato fiirsashada. Marka inaad tusaale wanaagsan adigu u noqoto, sida nolol an lahayn dunuuub, deroogo, iyo gacan ka hadal ayaa aad u muhiim ah.
- » Carruurtaada ku barbaari in ay ku xamdiyaan waxa ay haystaan, adoo tusaale u noqonaya in ad ku xamdidid waxyaabaha noloshaada la soo gudboonaada iyo dadka ad nolosha la qaybsatid.
- » Mar walba farrintaada ad carruurta u gudbinaysid ha ahaato isku mid, oo inkastoo ad shuruud la'aan jeceshahay, haddana dhaqanka lidka ku ah bulshada inaan la aqbali Karin. Su'aalo weydi si ad u yeelataan wada hadal daacada.
- » Xoogga saar muhiimadda ay leedahay in "ad u dhaqantid kan dhabtaa ee ad tahay" iyo in ad ku abaalmarisid marka ay sameeyaan "wax wanaagsan" inkastoo asaagood saamayn ku leeyahay.
- » Tus in dadka kale oo loo caafyo waxyeelada xumaatada ay kuu geystaan ay ka fiican tahay in ad ka aargoosatid.
- » Isha ku hay dookha carruurtaada ee filimada, fiidiyowada, iyo bogogga internetka ay badanaaba galaan. Haddii ad aragtid in ay si joogtaa u daawadaan waxyaabo leh dambi iyo gacan ka hadal,
- » Demonstrate that forgiving others for their harmful actions towards you is better than trying to take/plot revenge.
- » Despite peer pressure, them for doing the right thing, being true to self, and reward honest conversations for an acceptable. Ask questions for an antisocial behavior is not you love them unconditionally, message to kids although honest communication.
- » Remain consistent in your antisocial behavior is not rewarding them for doing the right thing, being true to self, and reward honest communication.
- » Empphasize the importance of honest communication.
- » Despite peer pressure, them for doing the right thing, being true to self, and reward honest communication.
- » Demonstrate that forgiving others for their harmful actions towards you is better than trying to take/plot revenge.
- » Keep an eye on your kids' choice of movies, videos, and internet sites/plot revenge.
- » Make your kids understand that prevention will help your kids stay and gangs.
- » Make your kids understand that neighbours, and the community, come from having good trusting relationships with family, friends, long lasting happiness in life although money is important, choices.

la hadal oo tus meela kaloo maawelo leh.

» Carruurtaada fahamsii in inkastoo lacagtu muhiim tahay, farxadda dhabtaa ee nolosha in ay ka timaaddo xiriir wanaagsan oo is aaminaad leh oo lala yeesho qoyska, saaxiibada, dariska, iyo beesha.

» Haddii ad ka walwalsan tahay in ay suurtowdo in carruurtaadu ku lug leedahay dhaqamo lid ku ah bulshada ama ayaga wax yeelaya, xusuusnow in arrintaa wax laga baddali karo.

» Iska ilaali 'jacaylka kakan' sida in ad ka aamustid ama u diidid in ay magaalada u baxaan. Baddalkeeda, la hadal oo carruurtaada fahamsii in dookh khaldan iyo khaladdaad la sameeyaa ay qayb ka yihii waxbarashada iyo in ad mar walba gacan ka siinaysid sidii ay u sixi lahaayeen khaladdaadkooda.

» Markii ad ka walwalsan tahay wanaagga carruurtaada oo ad u baahan tahay caawimaad, la hadal macalinka iskoolkooda, la taliyaha, ama xataa sarkaal booliisa. In ciyow dhibaatada la fiiryo lagana hortago ayaa carruurtaada wax ka taraysa in ay toosnaadaan kana badbaadaan in ay lugta la galaan nolosha khatartaa ee dambiga, gacan ka hadalka iyo gaangiska.



Carruurta dareensan in ay ku xiran yihiin qoyskooda, saaxiibadood, iskoolka, dariska, iyo beesha waa yar tahay in ay galaan gaangiska.

Carruurtu waxay sheegaan in ay nolosha ku faraxsan yihiin marka uu gurigooda joogo qof weyn sida waalidka, qaraabada, ama daryeele og meesha ay jiraan, cidda ay la joogaan, iyo waxa ay samaynayaan.

Kids report high life satisfaction when they have an adult in their home such as a parent, relative, or a caregiver who knows where they are, who they are with, and what they are doing.

Kids who feel connected with their family, friends, school, neighbourhood, and community are less likely to get involved in gangs.



Potential Risk Factors	
Social Level (External)	Individual Level (Internal)
» High expectations from teachers	» High expectations from teachers
» School and leisure activities	» School Success
» Parental/Adult involvement in activities	» Authenticity ('being true to self')
» Involvement in pro-social community	» Humility
» Positive connections with the community	» Forgiveness
» Strong commitments to school	» Gratitude
» Pro-social peers	» Balanced self-esteem
» And peers	» Optimism and hope
» Positive relationships with family	» Low level of belief in violence
Social Level (External)	Individual Level (Internal)
Potential Protective Factors	
» Sense of alienation	» School failure
» Peer rejection	» Substance abuse
» Delinquent peers	» Weapons use
» High-crime neighbourhood	» Delinquency
» Low socio-economic status	» Early history of violence/disciplinary practices
» Disciplinary/practical abuse	» Personality traits
» Inconsistent/happy parenting	» Unemotional/Callous
» Limited parental monitoring	» Impulsivity
» Family violence	» Antisocial beliefs
» Substance abuse in the family	» Substance abuse
» Family violence	» Impulsivity
» Social Level (External)	» Family violence

Arrimaha Dhallinyarada Ilaalin Kara

Heerka Qofka (Gudaha)

- » Aaminsanaanta gacan ka hadalka oo hoosaysa
- » Rajo iyo wanaag filid qaba
- » Isku kalsooni miisaaman qaba
- » Mahadnaq iyo abaal qaba
- » Iscafis aaminsan
- » An isla weyneyn
- » Asal ah (u dhaqma sida qofka uu yahay)
- » Iskoolka ku fiican

Heerka Bulshada (Dibedda)

- » Xiriir wanaagsan la leh qoyska iyo saaxiibada
- » Saaxiibo wanaagsan leh
- » Iskoolka aad ugu dadaala
- » Xiriir wanaagsan bulshada la leh
- » Arrimaha bulshada ka qaybqaata
- » Waalidka / masuul weyn oo ku xiran iskoolka iyo arrimaha madadaalada
- » Macalimiinta ku kalsoon

Arrimaha Dhallinyarada Khatar U Keeni Kara

Heerka Qofka (Gudaha)

- » Aaminsan waxyaabo bulshada lid ku ah
- » Fudayd (an wax ka fiirsan)
- » Dareen / Naxariislahayn
- » Dambiyio gacan ka hadal horoo badan leh
- » Hubka isticmaala
- » Maandooriyeeyasha isticmaala
- » Iskoolka ku saaqida

Heerka Bulshada (Dibedda)

- » Qoyska oo dagaal u joog ah
- » Qoyska oo maandooriyeeyasha isticmaala
- » Waalidka oo an ilmaha saa uga warqabin
- » Edbin an wanaagsanay / joogta ahayn oo lagula dhaqmo
- » Meekhaan dhaqan dhaqaale oo hoose
- » Xaadaf dambigu ku badan yahay
- » Saaxiibo dambilayaala
- » Asaagii oo dayriya ama naca
- » Dareen dad ka go'id



Haddii ad ka walwalsan tahay in dhallinyaradu ku lug leedahay gaangiska?

La xiriir:

LAANTA CIIDAMADA WADAJIRKA LA DAGAALANKA
GAANGISKA IYO MUKHAADARAADKA – BIRITISH KOLOMBIYA

HOYGA SHABAKADDA : www.cfseu.bc.ca

HOYGA SHABAKADDA : www.endganglife.ca

FARRIINTA DANABKA : inquiries@cfseu.bc.ca

TELEFOONKA: 778-290-2040

KA HORTAGAYAASHA DAMBIYADA BIRITISH KOLOMBIYA

HOYGA SHABAKADDA : www.bccrimestoppers.com

TELEFOONKA: 1-800-222-TIPS (8477)

KHADKA DHALLINYARADA LA DAGAALANKA GACAN KA HADALKA

HOYGA SHABAKADDA : www.youthagainstviolenceline.com

KA HORTAGGA GAANGISKA BIRITISH KOLOMBIYA

HOYGA SHABAKADDA : www.gangprevention.ca

Contact:
Concerned about youth involvement in gangs?

THE COMBINED FORCES
SPECIAL ENFORCEMENT UNIT – BC

BC CRIME STOPPERS
WEB : www.bccrimestoppers.com
TEL : 1-800-222-TIPS (8477)

YOUTH AGAINST VIOLENCE LINE
WEB : www.youthagainstviolenceline.com
TEL : 778-290-2040

GANG PREVENTION IN BC
WEB : www.gangprevention.ca
TEL : 1-800-222-TIPS (8477)





Buugyarahaan waxaa la diyaariiyey ayadoo lala tashanaayo cilmibaarayaasha mashruuca
Acting Together – CURA, saraakiisha booliska, adeeg bixiyeyaasha, waalidka, iyo
dhallinyarada

Naqshadaynta buugyaraaha: KPU Marketing Services



Social Sciences and Humanities
Research Council of Canada

Conseil de recherches en
sciences humaines du Canada



Understanding Youth and Gangs [Somali]
MAY 2015

FEBRUARY 2015



Sciences humaines du Canada
Conseil de recherches en
sciences humaines du Canada



SACCAYV



Social Sciences and Humanities
Research Council of Canada



This booklet has been prepared in consultation with Acting Together-CURA project
researchers, police agents, service providers, parents, and youth.
Booklet design: KPU Marketing Services